Ogaysiiska Kulanada Dadwaynaha

# Fikradaha Dadwayanaha ee ku aadan Qalabka Muraaqabaynta Casriga ah

Kani waa wareegi koowaad ee lagu aruurinaayo fikradaha dadwaynuhu kaqabaan qalabka muraaqabaynta casriga ah noociisii hore. Wixii macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan qalabkaan ama Surveillance Ordinance (Qaabka Muraaqabaynta) booqo **seattle.gov/privacy**.

| | Kulanka 1 | Kulanka 2 | Kulanka 3 | Kulanka 4 | Kulanka 5 |
|---|---|---|---|---|---|
| **Waaxaha. Soojeedinta** | Waaxda Booliiska. | Gaadiidka, Waaxda Dab Damiska. | Waaxda Booliiska. | Waaxda Booliiska. | Gaadiidka, Waaxda Dab Damiska. |
| **Tariikhda iyo waqtiga** | Oktoobar 22, 2018 5-6:30 p.m. | Oktoobar 25, 2018 5-6:30 p.m. | Oktoobar 29, 2018 5-6:30 p.m. | Oktoobar 30, 2018 5-6:30 p.m. | Nofeembar 5, 2018 4:30-5:30 p.m. |
| **Goobta** | **Laanta Maktabada ee Magaalada Columbia** 4721 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118 | **Laanta Maktabada Southwest** 9010 35th Ave SW, Seattle, WA 98126 | **Bertha Knight Landes Room** 1st Floor City Hall - 600 4th Ave, Seattle, WA 98104 (5th Ave door) | **Laanta Maktabada Green Lake** 7364 East Green Lake Dr. N, Seattle, WA 98115 | **Laanta Maktabada Green Lake** 7364 East Green Lake Dr. N, Seattle, WA 98115 |

## Tignoolojiyadaha looga dooday kulanada waxaa kamid ah:

| **Gaadiidka** (kulanada 2 iyo 5) | **Waaxda Dab damiska.** (Kulanada 2 iyo 5) | **Waaxda Booliiska.** (Kulanada 1, 3, iyo 4) |
|---|---|---|
| Kaamirooyinka taraafikada iyo Qalabka Akhriya Aqoonsiga Shatiyada | Kaamirooyinka Dhacdooyinka Degdega ah iyo kaamiroyinka Hamzat | Nidaamyada Xakamaynta Baakinka iyo Qalabka Akhriya Aqoonsiga Shatiyada |

## Halkaan kabaro sida aad fikrado kudhiiban karto:

**Mudada ay furantahay fikrad kadhiibashada qalabkaan casriga ah waa Oktoobar 8 - Nofeembar 5, 2018.** Waxaa jira saddex qaab oo fikir lagu dhiiban karo:

1. Inaad kulanka kaqaybgasho. Fiiri shaxda kore oo ay kuqoran yihiin goobaha iyo xiliyada laqabanaayo kulanada.
2. Fikirkaaga kudir si oonleen ah **seattle.gov/privacy**.
3. Boosto udir: Surveillance & Privacy Program, Seattle IT, PO Box 94709, Seattle, WA 98124.

Fikrado kasta oo lasoo gudbiyo waxaa lagu darayaa War bixinta ugu danbaysa Surveillance Impact Report (Saamaraynta Qalabka Muraaqabada) ee loogudbiyo Dawlada hoose dadwaynuhuna ay akhri sankaraan. Si aad fikirkaaga udhiibato kadib marka mudadaan dhammaato, laxiriir Shaqaalaha Dawlada Hoose oo ciwaankoodu yahay **seattle.gov/Council**.

## Fadlan ogsoonow, kulankaan waa:

**Laduubayaa si muqaal ahaan ah.**

**Dalbo Diiwanka Galitaanka dadka Kaqaybgalaaya ay saxiixayaan.**

**Aruuri Fikradaha Dadwaynaha.**

**Wixi laxiriira adeegyada kulanada intay socdaan labixinaayo:** Fadlan noosoosheeg **labo asbuuc kahor taariikhda kulanku dhacayo** haddii adeegyada turjumida luuqada, ama adeegyo kale loobaahdo adoo email noogusoo diraaya **Surveillance@seattle.gov**.

City of Seattle

# Kaamirooyinka Dhacdooyinka Degdega ah

## Waaxda Dab damiska ee Seattle (WDS)

### Waa maxay tiknoolojiyadu?

Kaamirooyinka xaaladaha degdega ah waa kamirooyin casri ah oo loo adeegsado qaadista sawirada goobaha shilalku kadhacaan ee waaxda dab dabdamisku kajawaab celiyaan. Sawirada waxaa loosoo aruurshaa inay qayb kanoqdaan dukumiintiyada WDS ee shilalka dhaca.




### Maxaan u adeegsanaa qalabka tiknoolojiyada?

Aruurinta sawirada goobtaha shilalku kadhaceen ee laga falceliyay waa qaab tusmeedka ugu wanaagsan ee National Fire Protection. Sawiradaan waxay kacaawiyaan dhakhaatiirta helitaanka macluumaadka ay ubaahanyihiin inta lagu jiro gurmadka degdega ah, taasoo yarayn karta dhimashada suurtagalka ah ee bukaanada. Sawirada goobta shilku kadhacay waxay sidoo kale maclumaad qiimo badan siinayaan Laanta Baritaanka shilalka Dabka ee WDS.

Mudada ladhiiban karo fikradaha laxiriira aaladahaan casriga ah waa mid hadda socota. Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa **Seattle.gov/Surveillance.**

Dhammaan fikradaha ladhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Saamaynta Qalabka Muraaqabada ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir kadhiibato xili kabaxsan mudada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.

#### Aruurinta

Kadib markay qiimeeyaan goobta shilka, kooxda gurmadka degdega ah ayaa go'aaminaysa haddii sawirada goobta shilku gacan kagaysan karaan tacaalka dhanka caafimaadka ama ujedooyinka kale ee shilka dib loogu eegaayo.

#### Isticmaalka

Sawirada laga qaado goobta shilka ayna qaadaan kaamirooyinku waxaa lala wadaagi karaa dhakhtarka Medic One si uu bukaanka usiiyo daryeelka saxda ah. Sawirada ay qaadaan saraakiisha badbaadada iyo Laanta Baarista Dabka waxaa loo adeegsadaa baaristaanada furan ee laxiriira iskudhaca gaadiidka iyo dababka.

#### Ilaalinta

WBS waxay raacaysaa sharciyadeeda gudaha iyo sharciyada Washington ee laxiriira isticmalka, haynta, iyo faafinta sawirada. Xadidaado ayaa sidoo kale saaran isticmaalka kaamirooyinka xaaladaha degdega ah, waxaana kaliya isticmaali kara Baarayaasha dabka, Unug kamid ah Sarakiisha Badbaadada, iyo kooxda cabir bixinta uqaabilsan Medic One.

City of Seattle

# Kaamirada waxyaabaha Halista ah (HAZMAT)

## Waaxda Dab damiska ee Seattle




## Waa maxay tiknoolojiyadu?

Kooxda Kaamirooyinka inay Halista sheegaan uqaabilsan Waaxda Dab damiska Seattle waxay isticmaalaan kaamirad tableet leh si ay muqaal si toos ah ugusoo tabiyaan aalada FaceTime, taasoo muuqaalka ugudbinaaya qalab wax muraaqabeeya oo kuxiran laanta HazMat. Kooxdu waxay adeegsataa khad internetka MiFi-ga ah oo eray sireed leh si muuqaalka qaab amaan ah loogasoo gudbiyo tabletka looguna gudbiyo muraaqabeeyaha.

Mudada ladhiiban karo fikradaha laxiriira aaladahaan casriga ah waa mid hadda socota. Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa **Seattle.gov/surveillance.**

Dhammaan fikradaha ladhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Saamaynta Qalabka Muraaqabada ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir kadhiibato xili kabaxsan mudada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.

## Maxaan u adeegsanaa qalabka tiknoolojiyada?

Kaamirooyinka HazMat waxay usahlayaan kooxda gurmadka degdega ah inay aqoonsadaan ayna arkaan waxyaabaha halista ah ama sunta ah, ayagoo meel fog kataagan goobta halistu kajirto.  Waxay sidoo kale siisaa Madaxa goobta Shilka macluumaadka saxda ah ee loogu baahanyahay gaarista go'aano degdeg ah.

### Aruurinta

Markuu jiro shil laxiriira waxyaabaha halista ah, kooxda HazMat ee Waaxda Dab damiska Seattle waxay adeegsataa kaamirada tabletka kuxiran ee HazMat si ay muuqaal toos ah ugu tabiyaan laanta HazMat. Sawiro caadi ah ayaa sidoo kale lagu qaadi karaa tabletka. Taliyaha goobta shilka ayaa go'aaminaaya haddii isticmaalka tiknoolojiyadu muhiim tahay inta lagu jiro gurmadka.

### Isticmaalka

Muuqaalka iyo sawirada lagu qaado kaamirada HazMat waxaa loo adeegsadaa sahaminta dhacdada iyo in la aqoonsado waxyaabaha halista ah ee yaala goobta shilka. Sawirada caadiga ah waxaa loo adeegsan karaa baaritaanada dhacdada kadib ama waxaa loogudbiyaa laamaha fulinta sharciga haddii ay jiraan suuragalnimada faldanbiyeedyo.

### Ilaalinta

Tablet-yada waxaa kuxiran lambar sireed waxaana kaliya gali kara kooxda HazMat. Tabletyada waxaa kuxiran nidaam amaanka ah si looxaqiijiyo in macluumaadka layskugu gudbinaayo khadka internetka MiFi uu yahay mid amaan ah. Qalabka FaceTime wuxuu sidoo kale leeyahay nidaam difaac oo qayb-ka-qayb ah dhammaan inta gudbinta macluumaadku socodo. WBS waxay kaydisaa sawirada kujira kaydka labaad, oo ay kaliya gali karaan kooxda HazMat.

City of Seattle

# Akhriyaha Taarikada Laysinka oo Iskiis ah (ALPR) (Ilaaliye)

## Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska ee Seattle)



## Waa maxay farsamada?

ALPR waa isku jirka softweeyar iyo qalabka loo isticmaalo qaadista iyo kormeerka sawirada taarikada laysinka. Sawir qaadayaasha casriga ah oo fasiixa casriga ah leh ayaa hada lagu rakibay sideed ah baabuurta ilaalinta ee SPD si ay u qaadaan sawirada taarikadaha lavsinka.

## Maxaan u isticmaaleynaa farsamadan?

SPD waxay isticmaashaa ALPR si loo xaqiijiyo nabadgelyada dadwenaha iyo fulinta sharciyada la xiriiro baabuurta la xaday, hergelinta baakinka, iyo baaritaano kale oo socdo.

Waqtiga faallooyinka furan ee farsamadan ayaa hada socda. Waxaad faallooyin ku bixin kartaa **Seattle.gov/Surveillance**.

Faallooyinka dhamaan waxaa lagu dari doonaa Warbixinta Saameynta Dabagalka farsamadan waxaana loo gudbinayaa Golaha.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso war celin xili ka baxsan xiliga u furan faallooyinka, fadlan si toos ugu dir Golaha Magaalada.

### Uruurinta

Dhamaan xogta ay soo uruuriyeen nidaamyada ALPR (sawirada, lambarada taarikada laysinka ee kombiyuutarka turjumay, taariikhda, waqtiga, iyo goobta GPS) ayaa lagu kaydiyaa xifdiyaha (server) SPD. 90 maalmood ka dib dhamaan xogta ay soo uruuriyeen nidaamyada ALPR ayaa si iskeed ah loo tirtirayaa haddii xogta ay qayb ka ahayn baaritaan socdo.

### Isticmaalka

ALPR waxaa lagu isticmaalaa baaritaanada socdo ama dib u soo helista baabuurta lumay ama la xaday. Uruurinta ka dib, softweeyarka wuxuu soo saarayaa lambarka taarikada wuxuuna is barbardihigi lambarkaas iyo liiska taarikadaha laysinka ee la xiriira danbiyada furan ama kuwa la soo sheegay. Haddii is lahaansho la helo Sarkaalka Ilaalinta waa inuu xaqiijiya saxnaanta taarikada laysinka oo na ka hubsado qaybta dirida inta aan wax talaabo ah la qaadin. Mar kasta oo Sarkaalka Ilaalinta uu galo ALPR ama la xiriira qaybta dirida, waxaa la sameeyaa diwaan gelin xisaab lagu sameeyn karo.

### Ilaalinta

Qanuunka SPD 16.170 wuxuu ka hadlayaa sida Saraakiisha laga yaabo inay u isticmaalaan ALPR. Nidaamka wuxuu xadidayaa isticmaalka farsamada wuxuuna ka joojiyaa isticmaalayaasha guud ee ALPR inay helaan xogta marka laga reebo haddii xogta la xiriirta baaritaan dambi oo gar ah. Hawl kasta oo la xiriirta isticmaala doonaayo inuu helo macluumaadkan waa mid xisaab lagu sameeyn karo.

City of Seattle

# Hergelinta Nidaamyada Baakinka (oo ay ku jirto ALPR)

## Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska ee Seattle)

## Waa maxay farsamada?

Hergalinta Nidaamyada Baakinka waxaa ka mid ah sawir qaadaha iyo softweeyarda ALPR, softweeyerada Bootview ee lagu ogaado in baabuurka la qabanayo iyo in kale, qalabaadka Samsung ee lagu bixiyo qoraalka digniinta, softweeyarada Gtechna ee lagu daabaca qoraalka digniinta.



## Waa maxay farsamada?

SPD waxay fududeysaa socodka gaadiidka waxayna caawisaa maareynta hantida baakinada ku yaalo jidka dhinaciisa kuwaas oo la xiriira xadgudubyada baakinada Magaalada Seattle. Intaa waxaa dheer, SPD waxay isticmaashaa farsamadan si loo hergelayo Scofflaw oo ah sharciga Magaalada Seattle oo xukuma qabashada baabuurta..

Waqtiga faallooyinka furan ee farsamadan ayaa hada socda. Waxaad faallooyin ku bixin kartaa **Seattle.gov/Surveillance**.

Faallooyinka dhamaan waxaa lagu dari doonaa Warbixinta Saameynta Dabagalka farsamadan waxaana loo gudbinayaa Golaha.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso war celin xili ka baxsan xiliga u furan faallooyinka, fadlan si toos ugu dir Golaha Magaalada.

### Uruurinta

Xogta laga soo uruuriyay ALPR waxaa ka mid ah taarikadaha laysinka, taariikhda iyo waqtiga, iyo macluumaadka goobta GPS. Softiweeyarka Bootview wuxuu u fasaxayaa Saraakiisha Hergelinta Baakinka inay fiiriyaan macluumaadka Maxkamada Degmada Seattle ee ku saabsan shakhsiyaadka leh afar ama in kabadan oo ah tikirada baakinka oo aan lacagtooda la bixinin, waxaa ka mid ah lambarka taarikada laysinka, sharaxa baabuurka, fahfaahinta xad dhaafka horeeyay, iyo digniinada hada ah ama tikirada la bixiyay.

### Isticmaalka

ALPR waxaa lagu isticmaalaa hergelinta baakinada si la isku barbardhigo xad gudubyada baabuurta la dhigay baakinada waqtiga leh ama loo hergeliyo sharciga Scofflaw. Bootview waxaa loo isticmaalaa ogaanshaha baabuurta ku xad gudubta sharciga Scofflaw. Nidaamka waxaa maamula oo na haya Maxkamada Degmada Seattle. Qalabka Samsung ee gacanta waxaa loo isticmaalaa gelitaanka ablikeeshonka ku bixi-telefanka ee SDOT, fiirinta xogta miitarka baakinka, iyo siismada qoraalka digniinta. Softweeyarka Gtechna waxaa loo istcmaalaa daabicida qoraalka digniinta.

### Ilaalinta

Shakhsiyaadka waxaa laga yaabaa inay iska difaacaan baabuur qabashada ama ku xadgudubka baakinka iyaga oo u maraayo habka caadiga ah ee nidaamka degmada. Qawaaniinta hubinayo in asalka shaqaalaha la fiiriyo iyo in la helo macluumaadka ay soo saareen farsamada hergelinta baakinada waa la xakameeyay, waxaa ka mid ah: Qaanuunka SPD 12.040, Qaanuunka SPD 12.050, Qaanuunka SPD 12.080, Qaanuunka SPD 12.110, iyo Qaanuunka SPD 12.111.

City of Seattle

# AKHRIYAASHA AARGADA BAABUURKA

## Maxay tahay tiknaloojiyadu?

Akhriyaasha Aargada Baabuurka waa isku jir ka kooban barnaamijka kombuyuutarka gudihiisa ah iyo barnaamijyada kombuyuutarka ku shaqeeya kuwaas oo loo isticmaalo in lagu sawiro laguna ilaaliyo sawirada aargooyinka baabuurta. Kaamirooyin tayadoodu aad u sarayso ayaa lagu dhejin doonaa kala-goysyo baddan oo Magaalada oo dhan ku yaala si loogu caawiyo injineerada taraafikada ee SDOT in ay yareeyaan wakhtiyada safarka ama socodka ka dhaca guud ahaan Magaalada.

## Sabab aynu u isticmaalno tiknaloojiyada?

Si loo qiyaaso wakhtiga safarka ama socodka waa cabirka ugu muhiimsan ee lagu fahmo laguna yareeyo arimaha xiriirka la leh ciriiriga faraafikada ee magaalada. Akhriyaasha Aargada Baabuurka waxay u oggolaanaysaa SDOT in ay si dhakhso ah u xadido wakhtiyada safarka ama socodka ee loogu talogalay nidaamka farsamada, u qorshaynta taraafikada, iyo ujeeddooyin kala qaybin dadweynaha ah.

### Aruurin

Akhriyaasha Aargada Baabuurka waxay sawiraysaa sawirada aargooyinka baabuurta marka ay meesha kusoo dhowaadaan. Sawirada waxaa lagu baarayaa barnaamij kombuyuutar ah midkaas oo u sheegaya lambarka aargada baabuurka Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington (WSDOT) ee leh shaabada wakhtiga, lambarka aargada, kanaalka kaamarada Akhrisa Aargada Baabuurka, iyo aqoonsadaha (kalagoyska). WSDOT waxay ku shaqaysiisaa wakhtiga safarka ama socodka inta u dhaxaysa kalagoysyada kadibna waxay macluumaadka dib ugu diraysaa dhinaca SDOT.

### Isticmaalka

Macluumaadka laga aruuriyo dhinaca akhriyaasha aargada baabuurka waxaa loo isticmaalaa si loogu xisaabo wakhtiga dhexdhexaadka ah ee safarka iyo dib-u dhacyada. Macluumaadkan waxay u oggolaanaysaa injineerada taraafikada si ay u wanaajiyaan wakhtiga calaamada ama seenyaalaha taraafikada una bixiso macluumaad la siiyo dadka safarka ah midaas oo ku saabsan dib-u dhacyada la filanayo. Macluumaadka wakhtiga safarka ama socdaalka waxaa dhici karta in lagu muujiyo ama qoro calaamadaha ama seenyaalaha waddada ee eliktarooniga ah, waddooyinka waaweyn.




Muddada faalada furan ee loogu talogalay tiknaloojiyadaan waa mid hadda socota. Waxaad keeni kartaa faalooyinka dhinaca **Seattle.gov/Surveillance**.

Dhammaan faalooyinka waxaa lagu dari doonaa Warbixinta Saamaynta Ilaalada ku saabsan tiknaloojiyadan waxaana la siinayaa Guddiga.

Haddii aad jeceshahay in aad bixisid ficil-celin ka baxsan muddada faalada furan, fadlan si toos ah ugu soo dir dhinaca Guddiga Magaalada.

### Ilaalinta

Nidaamyada Akhriyaha Aargada Baabuurka ee SDOT waxaa loo sameeyay si loogu ilaaliyo socodka taraafikada iyo wakhtiga safarka ama socdaalka. Lambarada ku qoran aargada baabuurka waxaa si dhakhso ah loogu tirayaa kadib marka ay dhammaato xisaabinta wakhtiga safarka ama socdaalka. Macluumaadka ay ka hesho SDOT dhinaca WSDOT kaliya waxaa isku dara oona heli kara shaqaalaha SDOT. Wakhtigee aysan helin SDOT lambarada aargada baabuurka qofka.



Seattle Department of Transportation

# KAAMAROOYINKA TARAAFIKADA

## Maxay tahay tiknaloojiyadu?

Kaamarooyinka Taraafikada waa kaamarooyin muuqaal meel fog laga hago kuwaas oo loogu talogalay in lagu ilaaliyo taraafikada waddada ee baabuurka. Waxaa lagu xirayaa biraha taraafikada ee ku yaala waddooyinka waaweyn, kaamarooyinku waxay bixinayaan muuqaal toos ah oo lagu daawado wakhtiga saxda ah midaas oo la siiyo Xarunta Shaqada Gaadiidka ee SDOT.

## Sabab aynu u isticmaalno tiknaloojiyada?

Kaamarooyinka taraafikada waxaa loo isticmaalayaa in lagu ilaaliyo ciriiriga, shilalka, xiritaanka, iyo arimo kale oo taraafikada la xiriira. Muuqaalkaan wuxuu siinayaa injineerada SDOT macluumaadka lagama maarmaanka ah ee lagu oggaanayo looguna jawaabayo si dhakhso ah arimaha xiriirka la leh taraafikada. Haggaajinadaan waxay keenayaan in uu yaraado dib-u dhaca safarka ama socdaalka waxayna wanaajiyanaan ama kor u qaadayaan ammaanka iyo caafimaadka dadweynaha.

### Aruurin

Kaamarooyinka taraafikada waxay ilaaliyaan taraafikada baabuurka ee ah wakhtiga saxda ah. Muuqaalka tooska ah ee la daawado waxaa loo dirayaa Xarunta Shaqada Gaadiidka ee SDOT ee loogu talogalay ilaalinta wakhtiga-saxda ah. Kaamarooyinku waa kuwo meel fog laga hago, ayaga oo u oggolaanaya dadka shaqeeya in ay u dhaqaajiyaan kaamarooyinka xaalada taraafikada sida ugu fiican loo fahmo.

### Isticmaalka

Muuqaalka tooska ah ee la daawado ee ka ahaada kaamarooyinka taraafikada waxaa lagu xiriirinayaa Khariidada Macluumaadka Socdaalaha ama qofka Safarka ah ee ku jira bogga internetka SDOT, asaga oo u oggolaanaya dadka safarka ama socdaalka ah in ay arkaan xaaladaha taraafikada tooska iyo hadda ah. Isticmaalka kaamarooyinka taraafikada waxay u oggolaanaysaa shaqaalaha Xarunta Shqada Gaadiidka ee SDOT in ay uga jawaab celiyaan dhacdooyinka taraafikada tooska Seattle ayada oo ah qayb kamid ah qorshaha jawaab celinta deg-dega ah ee Magaalada.



Muddada faalada furan ee loogu talogalay tiknaloojiyadaan waa mid hadda socota. Waxaad keeni kartaa faalooyinka dhinaca **Seattle.gov/Surveillance**.

Dhammaan faalooyinka waxaa lagu dari doonaa Warbixinta Saamaynta Ilaalada ku saabsan tiknaloojiyadan waxaana la siinayaa Guddiga.

Haddii aad jeceshahay in aad bixisid ficil-celin ka baxsan muddada faalada furan, fadlan si toos ah ugu soo dir dhinaca Guddiga Magaalada.

### Ilaalinta

Tilmaamaha Nidaamka Xakameeya Kaamarada ee SDOT ayaa xukumaysa isticmaalka kaamarada, ay ku jirto shuruudaha loogu talogalay ilaalinta khusuusiyada qofka. Muuqaalka kaamarada taraafikada kaliya waxaa la keydiyaa xaalado aad gaar u ah si loogu isticmaalo si gooni ah dhinaca Xarunta Shaqada Gaadiidka. Muuqaalka la keydiyo ma ahan mid lala wadaagayo waax kale oo Magaalada ah ama hay'ad waxaana si ebed ah loogu tirayaa gudaha tobban maalmood.

Seattle Department of Transportation

SOMALI